



Salaan ka socota Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero

Subax wanaagsan qoysaska iyo shaqaalaha PPS!

Waxaan ku faraxsanahay in aan bilaabo maalintaydii kowaad aniga oo ah kormeeraha guud ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. Waxaan rajeynayaa in aanu bilaabi karno in uu midba midka kale barto maalmaha iyo toddobaadyada soo socda marka aan madaxada la soo galo shaqadan cusub.

Halkan waxaa ku qoran hal shay oo ay tahay in la ogaado oo aniga igu saabsan: Waxaan jecelahay in aan waqti ku qaato dugsiyada, waxaan qorsheynayaa in aan sameeyo inta ugu badan ee suurtagalka ah. La socodka ardayda iyo macallimiinta, in aan arko sahaminta, barashada iyo kobaca ka socda fasalka dhexdiisa ah – taasi waa waxa ay dhiirigeliya isla markaana tamarta i siiya. Nidaamka dugsiyada ee aan leenahay waa mid u dhisan in uu taageero waxbirid iyo waxbarasho awood leh.

PPS waxay soo martay marxalado adag. Iyada oo qaar ka mid ah ay yihiin kuwa gaar ah, hadana arrimo kale oo badan oo inaga horreeyay oo dhacay ayaa ah arrimo ay dugsiyada degmooyinka oo dhan ay la kulumayaan. Waqtigii gaabnaa ee aan ku bixiyay booqashooyinkii kala duwanaa ee degmada waxaan aad ula dhacay macallimiin taxirfada leh ee aan haysano ee dugsiyadeena hoggaaminaya iyo dadaalka ku aadan wanaaga iyo sinnaanta ay sida isku midka ah u wadaan macallimiinta iyo qoysasku. Kuwani waa faa'iidooyin muuqda oo aan aaminsanahay in ay aasaas adag u samayso mustaqbalkeenna isla markaana bixiso ballanqaadka waxbarashada dadweynaha oo loogu talagalay DHAMMAAN ardaydeena.

Rajadaydu waa in aan aniga laftaydu ku lug yeesho dugsiyadeena iyo waaxyaheena, oo aan si buuxda uga warqabo arrimaha ugu muhiimsan ee jira, isla markaana aan bilaabo in aan gogosha u xaaro qorshe dejinta muddada dheer. Waan ogahay in ay harsan tahay wax badan oo aan ka baranayo Portland iyo PPS, waxaan rabaa in aan hawsha bilaabo.

Fadlan ha ka gaabsan in aad igala soo xiriirto wixii su'aalo ama talooyin ah superintendent@pps.net.

U adeegaya ardaydeena,

Guadalupe Guerrero, Kormeeraha Guud